

# Xuquuqaha Biilka Macmiilka gudaha Cusbitaalka

## Bukaan ahaan ku jira cusbitaalka Gobolka New York, waxaad leedahay xaqa, waafaqsan sharciga, inaad:

- (1) Fahanto oo isticmaasho xuquuqahan. Haddii sabab kastaba aanad fahmin ama aad u baahan tahay caawimo, cusbitaalka WAA in uu bixiyaa caawimo, ay ka mid tahay turjubaan:
- (2) Hel macluumaadka daawaynta takoor la'aan sida isirka, midabka, diinta, siniga, aqoonsiga jinsiga, asalka qaranka, naafanimada, qaabka galmaada, da'da ama isha lacag bixinta.
- (3) Ku hela daryeel feejigan iyo ixtiraam leh deegaan nadiif ah oo badbaado ah oo ka xor ah xayiraadaha aan lama huraanka ahayn.
- (4) Hela daryeelka gurmadka haddii aad u baahan tahay.
- (5) Lagugu wargeliyo magaca iyo meesha dhakhtarka kaas oo ka masuul ahaan doono daryeelkaaga gudaha cusbitaalka.
- (6) Garanaya magacyada, boosaska iyo shaqada shaqaale kasta oo cusbitaal oo ku lug leh daryeelkaaga oo diida daawayntooda, baadhitaanka ama baadhida.
- (7) Aqoonsada daryeelle lagu dari doono qorshayntaada bixida iyo wadaaga macluumaadka daryeelka bixida ka horeeya ama tilmaamaha.
- (8) Helo macluumaadka dhammadyska tiran ee ku saabsan cudur aqoonsashada iyo sababta cudurka
- (9) Helo dhammaan macluumaadka aad u baahan tahay inaad bixiso oggolaanshaha lagu wargeliyey ee nidaam kasta oo la soo jeediyay ama daawaynta. Macluumaadkan waxaa ku jiri doono khataraha suuragalka ah iyo dheedaha nidaamka ama daawaynta.
- (10) Helo dhammaan macluumaadka aad u baahan tahay inaad bixiso oggolaanshaha laga warqabo ee nidaamka si dib loogu soo celiyo. Wuxaad sidoo kale leedahay xaqa aad ku magacowdo qof kuu bixiya oggolaanshaha adiga haddii aad u jirantahay si aad ah inaad sidaas samayso. Haddii aad jeelaan lahayd macluumaad dheeraad ah, fadlan waydii nuqulka buug yaraha "Go'an ka gaadhida Ku saabdan Daryeelka caafimaadka  
— Hagaha Bukaanada iyo Qoysaska."
- (11) Diiday daawaynta oo loo sheegay waxay tahay saamaynta caafimaad ee ay ku yeelanayso.
- (12) Diiday inuu ka qayb qaato cilmi baadhida. Go'an ka gaadhida haddii aad ka qayb gelayo ama aanad ka qayb gelayn sharaxa buuxa.
- (13) Gaar ahaanshaha marka cusbitaalka lagu jiro iyo qarsoodiga dhammaan macluumaadka ku saabsan daryeelkaaga.
- (14) Ka qayb gal dhammaan go'aamada ku saabsan daawayntaada iyo ka bixida cusbitaalka. Cusbitaalku waa inuu ku siyya aadiga qorshaha qoran ee cusbitaal ka bixida iyo sharaxa qoran ee sida aad rafcaan uga qaadan karto ka bixitaankaaga.
- (15) Dib u eeg diiwaanka caafimaadka kharash la'aan oo geli nuqul diiwaankaaga caafimaadka ah kaas oo cusbitaalka ay kaa qaadi karaan kharash macquul ah. Ma dafiri kartid nuqulka keliya sababtoo ah ma awoodid inaad bixiso.
- (16) Hel biilka hal shay loo sheegay iyo sharaxaada dhammaan kharashyada.
- (17) Arag liiska cusbitaalka kharashka heerkiisa ee sheeyada iyo adeegyada iyo qorshayaasha caafimaadka cusbitaalku ka qayb galo.
- (18) Caqabada biilka aan la filayn dhexda nidaamka Xalka Khilaafka Madaxa banaan.
- (19) Cabashada baqdin la'aanta ee aargoosiga ku saabsan adeegyada daryeelka aad helayso iyo inuu cusbitaalku kuu jawaabo adiga iyo haddii la codsado, jawaab qoran. Haddii aanad ku qanasanayn jawaabta cusbitaalka, waxaad u caban kartaa Waaxda Caafimaadka Gobolka New York. Cusbitaalku waa inuu ku siyya lambarka telefoonka Waaxda caafimaadka Gobolka.
- (20) Oggolaadaa xubnahan qoysaska iyo dadka waa wayn ee kale ee la siin doono ahmiyada inay booqdaan si waafaqsan kartidaada aay ku qaabilayso booqdayasha.
- (21) Dadka ogaysii rabitaankaaga ku saabsan hadyadaha jidhka qofka marka uu dhinto. Dadka lix iyo tobant sano jirka ah ama ka wayn waxay qori karaan oggolaanshahooda si ay ugu deeqaan xubnaha, indha iyo/ama nudaha, markay dhintaan, iyagoo iska diiwaangelinaya NYS Diiwanka Ku deeqida Nolosha ama qoraya oggolaanshhooda xubinta iyo/ama nudda jidhka ku deeqida qoraal ahaan tiro qaabab ah (sida wakiilka caafimaadka, dardaarancka, kaadhka ku deeqaha, ama warqad kale oo saxeexan). Wakiilka daryeelka caafimaadka waxaa laga heli karaa cusbitaalka.

Sharciga Caafimaadka Dad waynaha (PHL)2803 (1)(g)Xuquuqda bukaanka, 10NYCRR, 405.7,405.7(a)(1),405.7(c)